MAABKA NADAMKA WAXBARASHADA VICTORIA

cmy Centre for Multicultural Youth

DUGSIYADA LUQADDA INGIRIISIGA (ESL) IYO XARUUMAHA

ENG

Loogu talagalay ardayda da'da dugsiga oo uga soo guurey Victoria waddamada kala duwan. Waxay bixiyaan 6-12 bilood oo ah waxbarashada Luqadda Ingiriisiga Degdeggaa.

BARNAAMIJKA INGIRIISIGA SOO-GALOOTIGA DADKA WAAWEYN (AMEP)

ENG 18+

Waa daraasadda Luqadda Ingiriisiga ah oo loogu talagalay dadka dhallin-yarada ah oo ka weyn 18.

Dugsiga Hoose 5-12 SANO JIRKA.

Cid kastaa waa inay dhigataa oo dhammaysaa 7 sannadood oo dugsi hoose ah (Asaaska ilaa Sannadka 6aad).

Dugsiga Sare 13-16 SANO JIRKA.

Cid kastaa waa inay dhigataa oo dhammaysaa ugu yaraan 4 heerar oo dugsi sare ah (Sanooyinka 7aad-10aad).

Dugsiga Sare ee siniyarka 16+ SANO JIRKA.

Waa sanooyinka ugu dambeeya dugsiga sare Sannadka 11aad-12aad. Cid kasta waa inuu qaataa dugsiga sare oo waqti-buuxa ah ama waxbarasho ama tababar kale ilaa da'da 17aad. Dugsiyadu waxay bixiyaan khayaarada waxbarashada kala duwan ee ardayda kala duwan ah.

TAFE iyo RTOs

Machadyada Taknikada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Haya'daha Tababarka Diiwaangashan waxay qabtaan koorsooyinka Wabarashada Mihniga ama Tababarka (VET) kuwaas oo xoogga saara waayo-aragnimo camali ah ee diyaarinta shaqo-helidda. Machadyada TAFE waxaa leh dowladda halka RTOs ay yihiin koleejooyin gaar ah ama haya'daha sanaacooyinka.

JAAMACADDA

Waxay bixisaa daraasado kala heerar duwan iyo koorsooyin bal-laaran, qaarkood waxay horseedaan shaqooyin gaar ah kuwa kalena waa koorsooyin guud.

VCAL(Shahaadada Victoria ee Waxbarashada La-dhaqangeliyey)

2/3 sano shahaado WB ah waxaa ku jira waxbarasho farsamo oo la siiyo ardayda dhigata Sannadaha 11aad iyo 12aad. Waxay u diyaarisaa waxbarasho dheeraad ah, tababar, shaqo-ku-barasho ama shaqo-helid. Waxaa lagu dhammaysan karaa dugsiga ama TAFE waxaana ka mid ah koorsooyinka VET.

VCE (Shahaadada Waxbarashada ee Victoria)

2/3 sano shahaado WB ah oo la siiyo ardayda Sannadka 11aad iyo 12aad. Waxay u diyaarisaa waxbarasho dheeraad ah oo lagu qaato jaamacadda. Waxaa lagu dhammaysan karaa dugsiga ama TAFE waxaana ka mid ah koorsooyinka VET.

Shahaadada I ilaa IV

Waxay bixisaa horudhaca loo sameeyo aqoon iyo xirfado gaar ah. Koorsooyinku waxay u kala duwan yihiin xagga dherarka laga bilaabo lix bilood ilaa laba sano.

DIPLOMA/ DIPLOMA SARE

Waxay siisaa shaqsiyaadka xirfado taknikaal ah iyo aqoon sare. Dibloomooyinka qaarkood waxay u baahan yihiin dhammaystirka Shahaadada 1v ee koorsada la dfoonayo.
Dibloomada: 2 sano WB ah ama 4 sano WDH ah Tan Sare: 3 sano WB ah ama 6 sano WDH ah.

DIGRIIGA BAJALOORKA

3-4 sano WB ah ama 6-8 sano WDH ah Xoogga lagu saarayo hal maaddo.

FT = Waqti Buuxa
PT = Waqti Dhimman

KHAYAARADA WAXBARASHADA DHEERAADKA AH (ka dib dhammaynta Digriiga Bajaloorka)

Shahaadada Garaajuweytka: - 6 bilood WB ah ama 1 sano WDH
Diblomada Garaajuweytka: 1 sano WB ah ama 2 sano WDH ah.
Digriiga Mastarka: 1 sano WB ah ama WDH u-dhima.
Digriiga Dhoctarka: waa dhammaystirka digriiga Mastarka. 3 – 4 sano WB ah ama Waqti-dhimman in u dhigma.